



# Guurka Qasabka ah QORSHAHA AMMAANKA

## Waa maxay guurka qasabka ah:

Qof kasta oo Australia ku nool waa u xor inuu doorto, cidda iyo marka ay guursanayaan. Ku-qasbidda qofka inuu guursado markaysan doonayn lama aqbali karo waana ka dambi Australia. 'Guurka qasabka ah' wuxuu dhacaa markii qofku guursado asagoon si madaxbanaan ama si buuxda u ogolaan guurka, sababtoo ah waa la qasbay,

la handadey ama waa la khayaaney. Qofk kastaa wuxuu noqon karaa dhibanaha guurka qasabka ah ayadoon loo eegayn da'dooda, sinsjigooda ama qaabka galmada ama diintooda ama asalka dhaqankooda. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan guurka qasabka ah online-ka ah [www.ag.gov.au/forcedmarriage](http://www.ag.gov.au/forcedmarriage)

**Waa maxay macnaha ogolaanshaha madaxbanaan oo buuxa?**  
*Ogolaanshaha sida madaxbanaan oo buuxda ah macnahiisu waa in qofku awoodo inuu doorto, qofka marka uu guursanayo iyo in ay doonayaan inay guursadaan. Shaxda hoose waxay sharxaysaa waxa uu yahay macnaha ogolaanshaha madaxbanaan oo buuxa*

Ogolaanshaha madaxbanaan oo buuxa waa:	Ogolaanshaha madaxbanaan oo buuxa mana ahan:
<ul style="list-style-type: none"> <li>doorashada inaad guursato sababtoo ah waxaad dareemaysaa inaad diyaar u tahay inaad guursato</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato sababtoo ah handadaad ama adeegsi xoog ama qasbid adiga iyo dad kale lagu sameeyey, oo ay ka mid tahay rabshadda jidheed ama galmeed</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>doorashada inaad guursato sababtoo ah waxaad jeceshay inaad guursato</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato sababtoo ah waxaa lagu xabisay si sharci darro ah ama lagu hayey ayadoo aadan doonayn</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>doorashada inaad guursato sababtoo ah waxaad jeceshay inaad guursato wadeygaaga mustaqbalka</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanta inaad guursato sababtoo ah cadaadis caadifadeed ama nafsiyeed, oo ay ka mid yihiin inaad doonayn inaad u keento ceeb qoyskiina</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>awoodida inaad dooran inaad guursato adoon ka cabsanayn cawaaqibta kaaga imaanaysa, iyo</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato adoo ka ambaqaadaya mudeecnimada aad qof u hayso kaas oo aad ku kalsoon tahay sida waalidkaaga ama awoowehaaga/ayeeyadaada</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>awoodida inaad dooran inaad guursato adoon ka cabsanayn cawaaqibta u imaanaysa dadka kale.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato sababtoo ah taas baa ah waxay dadka kale ee dhaqankaaga ama bulshadaada ay filayaan</li> </ul>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato sababtoo ah dhaqaale ahaan ayaa laguugu xadgudbey (tusaale ahaan, mushaarkaaga, lacagaha lagu isticmaalo waxyaalaha maalin kasta loo baahdo sida cuntada, ama qaabab kale taageero lagaa xayiray)</li> </ul>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato sababtoo ah qaabab kale oo qasab ah, oo ay ka mid yihiin handadaad ama cid kaa xayirta dokumantiyo muhiim ah, sida baasaboorka, ama</li> </ul>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ogolaanshaha inaad guursato markii lagu khayaanay ama lagu dhagray wax ku saabsan guurka la soo-jeediyey.</li> </ul>

*Ogolaanshaha madaxbanaan oo buuxa ma samayn karo qof kaas oo aan garanayn waxay ogolaanayaan. Taas macnaheedu waa in dadka qaarkiis aysan samayn karin ogolaansho sax ah xagga guurka sababtoo ah da'dooda ama kartidooda caqliyeed.*



## Guurka Qasabka ah QORSHAHA AMMAANKA

### Waa maxay qorshaha ammaanku sidee bayse ii-caawin kartaa?

Qorshaha ammaanku waa tilmaame kaa caawinaya inaad naftaada ilaaliso aadna si ammaan ah u hesho caawimaad. Waad adeegsan kartaa qorshahan haddii aad ka cabsanayso wax ku saabsan in lagu guuriyo, aad ka cabsanayso inaad diido guur ama aad ka cabsanayso inaad ka tagto guur aadan marna ogolaan.

Samaynta qorshahan ammaanka wuxuu kaa caawin doonaa inaad:

- hesho caawimaad oo si ammaan ah ula hadasho dadka kale
- hore u sii qorshaysato sidaad wax uga qaban lahayd xaaladaha qalafsan
- guriga si ammaan ah ku joogto ama ugu diyaargarowdo inaad si ammaan ah uga tagto, iyo inaad
- hubi inaan dibadda lagu wadin si lagu soo guursado.

### Sidee baan u samayn karaa qorshaha ammaanka?

Waxaad u samayn kartaa qorshaha ammaanka adigoo raacaya lixdan tallaabo ee hoose:

1. Haddii ay ammaan tahay inaad sidaas sameyso, weydiiso qof aad ku kalsoon tahay, sida saaxiibka ama baraha, inuu kaa caawiyo qorshaha ammaanka.
2. Aad meel ammaan ah halkaas oo aan lagu khash-khashayn ama lagaa heli karin.
3. Si taxadar ah u aqri macluumaadka muhiimka ah oo ku yaal bogga soo socda oo ku saabsan si ammaan ah u-wada-xiriiridda.
4. Ka jawaab su'aalaha ku yaal teembalaytka sida ugu fiican oo aad awoodo.
5. Ku hayso qorshaha ammaankaaga meel ammaan ah. Waxaad u baahan kartaa inaad qariso ama aad uga tagto qof aad ku kalsoon tahay.
6. Badanaa dib-u-eeg qorshaaga si uu mar kasta u ahaado mid cusboonaysiisan.

### Qoraalka loogu tala-galay haya'daha:

Haddii aad ka caawinayso qofka si uu u sameeyo qorshahan ammaanka ee guurka qasabka ah, waxaa muhiim ah inaad aqriso oo garato macluumaadka ku yaal Tasmada Kowaad oo ku saabsan la-kulmida qof khatarta ugu jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah.

### Sidee baan caawimaad ku heli karaa?

Haddii laguugu xadgudbey si caadifad ah, jidh ahaan ah ama af ahaan ah, ama aadan dareemayn ammaan waxaad dalban kartaa caawimaad.

Haddii aad u malaynayso inaad adigu ama cid kale ay ku sugan yihiin khatar degdeg ah waxaad wacdaa **Saddex Eber (000) waxaadna weydiisataa caawimaad**. Haddi kaleeto, waxaad kala xiriiri kartaa Boliiska Federaalka Australia (Australian Federal Police (AFP) wixii caawimaad iyo talooyin ah. AFP waxay ilaalisaa dadka kuwaas oo khatarta ugu jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah waxaana si gaar ah loogu tababaray inay wax ka qabtaan xaaladahaas. Waxay awoodaan inay kuu diraan taageero si lagaaga caawiyo inaad hesho hoy ammaan ah, taageero dhaqaale, daaweyn caafimaad, la-talin iyo helidda talooyinka sharciiyeed iyo kuwa socdaaleed. **Waxaad kula xiriiri kartaa AFP si aan magac lahayn adigoo ka wacaya 131 AFP (131 237) ama adoo ka soo buuxinaya foom online ah bogga website-ka AFP: <[https://forms.afp.gov.au/online\\_forms/human\\_trafficking\\_form](https://forms.afp.gov.au/online_forms/human_trafficking_form)>** Waxaad kaloo la hadli kartaa qof aad ku kalsoon tahay, sida saaxiib ama waalidkooda, ama walaalaha waaweyn, baraha ama qof aad isla-shaqaysaan. Haddii aadan ku jirin khatar degdeg ah, qaar **haya'daha bulshada takhasuslaha ah** ayaa waxay awoodaan inay ku taageeraan oo ku caawiyaan.

Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda taleefanka waxaa lagala xiriiri karaa 131 450.



# Qorshaha Ammaanka SIDA SI AMMAAN LOOGU WADA-XIRIIRO

Haddii aad khatar ugu jirto ama aad ugu jiri doonto guurka qasabka ah waxaa muhiim ah inaad dalbato caawimaad. Macluumaadka hoose ayaa kaa caawin doona inaad si ammaan ah ula xiriirto dadka isku dayaya inay ku caawiyaan oo gacan ku siiyaan.

## Ku-hadlidda taleefanka iyo texti diridda

- Haddii aad ka walwalsan tahay in cid kale ay fatashto taleefankaaga waxaad weydiisan kartaa inaad ka amaahato taleefan qof kale oo aad ku kalsoon tahay, weydiiso inaad adeegsato taleefanka shaqada ama dugsiga, ama adeegso taleefanka lacagta ah. Haddii ay ammaan tahay in sidaas sameeyo, waxaad si qarsoodi ah u soo gadan kartaa taleefanka moobaylka oo raqiiska ah si aad u adeegsato.
- Keliya wac markaad keligaa tahay ama aad la joogto qof aad ku kalsoon tahay.
- Ka fakar eray ammaan ah oo aad adeegsan karto markaad taleefanka ku hadlayso ama aad u dirayso farriimaha textiga ah qof aad ku kalsoon tahay. Waxaad adeegsan kartaa erayga ammaanka ah mustaqbalka si aad u xaqiijiso aqoonsigaaga, iyo inay ammaan kuu tahay inaad hadasho (tusaale, erayga ammaanka ah wuxuu noqon karaa jawaabta su'aal lays weydiyo mar kasta oo aad hadlayso). Dooro eray ammaan ah oo adiga iyo qofkaad ku kalsoon tahay keliya isla taqaanaan.
- Xusuusnow in wicitaankii kastaaba oo aad samayso inuu ka soo muuqanayo biilka taleefanka ama loogga wicitaanka.
- Haddii aad awoodo, ka tirtir diiwaanka wicitaankaaga loogga wicitaanka. Haddii aad adeegsato taleefanka guriga ama landline-ka, wac lambar kale markaad dhammayso wicitaanka. Taasi waxay joojinaysaa in cid kale oo adeegsanaysa shaqada redial-ka inay ogaato qofkaad wacday.
- Waxaad u baahan kartaa inaad tirtirto wixii farriimo qoraal ahaa oo aad dirtay ama aad heshay.
- Ku kaydso lambarka AFP (131 AFP (131 237)) iyo kan qofka aad ku kalsoon tahay magac kale oo ka duwan kaas oo aan shaki abuurayn.

## Adeegsiga email-ka

- Isku day adeegsiga kombiyuutarada dadweynaha ama kombiyuutar kale oo qof kale oo qoyskaaga ah ama bulshada ah uusan adeegsan karin. Waxaad amaahan kartaa kombiyuutarka qof aad ku kalsoon tahay ama adeegso kombiyuutarka dugsiga, shaqada ama maktabadda dadweynaha.
- Tirtir sooyaalka barowsarkaaga iyo cookies-kaaga haddii aad u malaynayso xubnaha qoyskaaga ama bulshada inay adeegsan karaan kombiyuutarka.
- Adeegso cinwaanka email gaar ah oo qof kale oo qoyskaaga ah ama bulshada ah uusan adeegsan karin. Waxaad samaysan kartaa cinwaan email oo cusub oo ah kan online-ka lacag la'aanta ah ee Gmail ama Yahoo.
- Ka fiirso wax ku saabsan khatarta in emailkaaga inay aqrisan karto cid kale, daabacan karto ama gudbin karto.
- Waxaad u baahan tahay inaad tirtirto wixii farriimo email ah oo aad dirto ama aad hesho.

## Ula-kulmidda qof kale fool-ka-fool

- Ku-kulma meel ammaan ah oo gaar ah halkaas oo aysan ku garanayn cid kale.
- Waxaa kugu adkaan karta inaad la kulanto dad aan qayb ka ahayn qoyskaaga ama bulshadaada aydoo uusan jirin wax ogolaansho ah. Haddii ay saas tahay, isku day inaad la kulanto qof aad ku kalsoon tahay, kaas oo diyaarin kara in dad kale idiin kala soo qaybgalaan.
- Waxaad kaloo isku dayi kartaa inaad ku kulantaan meel halkaas oo qoyskiinu ama bulshadiinu aysan ogaanayn waxaad samaynayso, sida dugsigaaga ama shaqadaada ama meel kale oo aad uga baahan karto baaris 'gaar' ah, sida kilinikada dhaqtarka.



# Qorshaha Ammaanka: TEMBALAYTKA

## Yaan la hadli karaa?

Haddii aadan doonayn inaad haysato koobiga qorshaha ammaanka, waxaad buuxin kartaa oo goyn kartaa macluumaadka muhiimka ah oo ku yaal khaanadda xariiqaha-dhibcaysan. Ku qari qaybta aad goysey meel si fudud looga heli karo si aad u ogaato sida loo helo caawimaad iyo talooyin.

Waan aqriyey macluumaadka ku yaal bogga kowaad oo ku saabsan si ammaan ah u-wad-xiriirid.

Dadka qaarkiis iyo haya'daha aan la hadli karo si aan uga helo caawimaad, taageero iyo talooyinba waa:

• Boliiska Federaalka Australia (Australian Federal Police (AFP)) \_\_\_\_\_ 131 AFP (131 237)

• \_\_\_\_\_

• \_\_\_\_\_

• \_\_\_\_\_

Waxaan ku haysan doonaa liiska lambaradan meel ammaan ah \_\_\_\_\_

Markaan kula xiriiro \_\_\_\_\_ taleefan/text/email/fool-ka-fool, waxaan hubin doonaa inaan ammaan ahay anigoo qabanaya waxyaalahan:

• \_\_\_\_\_

• \_\_\_\_\_

• \_\_\_\_\_

## Ma hubo waxa aan doonayo inaan sameeyo?

Qaybta waxay kaa caawin doontaa haddii aad ka walwalsan tahay in lagu guuriyo qof hase ahaatee aadan hubin waxaad samayso.

Qof aan ku kalsoonahay oo aan la hadli karo haddii aanan doonayn in lay guursado waa: \_\_\_\_\_

Waxaan uga tagoonayaa koobiga qorshahayga ammaanka ee buuxsan qof aan ku kalsoonahay: \_\_\_\_\_

Haddii aan ku faraxsanahay oo ku ammaansanahay, waxaan kala hadli doonaa dadkan qoyskayga iyo bulshadayda ah wax ku saabsan guurka qasabka ah:

- Waxaan u sharxi doonaa dadkaan in guurka qasabka ah uu sharci darro ka yahay Australia iyo inaan cid xaq u lahayn inay ii guuriso cid aanan doonayn. Waxaan samayn doonaa aniga oo oranaya:

---



---



---

- Waxaan heli karaa caawimaad inaan la hadlo dadkaan ka socda qofkan: \_\_\_\_\_

### Maxaan samayn karaa si aan ammaan guriga ugu joogo?

*Xataa haddii aad dareento ammaan waxaa muhiim ah inaad diyaar u tahay inaad si dhaqso iyo ammaan ah guriga uga tagto.*

- Saddex xaaladood oo suurtagal ah kuwaas oo halis gelin kara ammaankayga xagga guriga waa:

1. \_\_\_\_\_

2. \_\_\_\_\_

3. \_\_\_\_\_

- Waxaan kula dhaqmi karaa xaaladahan:

1. \_\_\_\_\_

2. \_\_\_\_\_

3. \_\_\_\_\_

- Haddii ay ammaan tahay in sidaas sameeyo, waxaan haysan doonaa liiska wixii handadaad ah, rabshad ah, xadgudub ah ama kadeed ah, oo ay ka mid yihiin taariikhaha iyo waqtiyada.

- Saddex meelood oo ammaan ah oo aan aadi karo haddaan u baahdo inaan si dhaqso ah oo ammaan ah guriga uga tago waa:

1. \_\_\_\_\_

- Cinwaanka:

- Faahfaahinta xiriirka (oo ay ku jiraan saacadaha shaqada kadib): \_\_\_\_\_

- Habka iigu dhaqsaha badan iiguna ammaansan si aan ugu safro meeshaas ammaanka ah waa (wadada baska iwm): \_\_\_\_\_

---

2. \_\_\_\_\_

- Cinwaanka: \_\_\_\_\_

- Faahfaahinta xiriirada (oo ay ka midka yihiin saacadaha shaqada kadib): \_\_\_\_\_

- Habka iigu dhaqsaha badan iiguna ammaansan si aan ugu safro meeshaas ammaanka ah waa (wadooyinka baska iwm): \_\_\_\_\_

---

3.

- Cinwaanka:
- Faahfaahinta xiriirada (oo ay ka midka yihiin saacadaha shaqada kadib):
- Habka iigu dhaqsaha badan iiguna ammaansan si aan ugu safro meeshaas ammaanka ah waa (wadooyinka baska iwm):

Dokumantiyada ugu muhiimsan oo aan isku dayi doono inaan qaato haddii aan u baahdo inaan tago waa:

- *baasaboorka*
- *laysanka darawalka*
- *sawirada aqoonsiga ee kale*
- *shahaadooyinka dhalashada ama/iyo guurka*
- *kaarka Medicare-ka*
- *faahfaahinta bangiga*

•

•

•

Haddii aan awoodo, waxaan isku dayi doonaa inaan koobiyo ka samaysto dokumantiyadan aana ku haysto meel ammaan ah oo si fudud uga heli karo ama waxaan u dhiibayaa qof aan ku kalsoonahay.

Hababka ugu dhaqsaha badan uguna ammaansan ee looga tago gurigayga/dugsiga/shaqada waa:

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

Waxaan tijaabin doonaa sidaan dhaqso uga tegi lahaa siyaabahan.

**Sidee baan carruurtayda ammaan uga dhigi karaa?**

- Waxaan hubin doonaa in carruurtaydu isticmaasho taleefanka si ay u wacaan boliiska ama cid kale oo aan ku kalsoonahay si aan uga codsado caawimaad ayna ii-siiyaan cinwaankooda.
- Waxaan ka fakarayaa inaan la adeegsado eray baaq ah carruurtayda si ay u ogaadaan inaan doonayo inay wacaan caawimaad.
- Waxaan u sheegi doonaa dadkan jooga dugsiga carruurtayda inaan ka walwalsanahay wax ku saabsan ilaalinta carruurtayda:

---



---

**Maxaa dhacaya haddii aan u malaynayo inaan aadayo dibadda?**

- Waxaan la xiriiri doonaa haya'dda bulshada takhsuslaha ah sida ugu dhaqsaha badan si aan uga codsado caawimaad iyo talooyin haddii aan u malaynayo in dibadda la iila qaadayo saygayga ama la doonayo in dibadda laygu soo guursado.
- Haddii qoyskaygu i-weydiistaan inaan dibadda u socdaalo oo aan ka shakiyo in la doonayo in dibadda laygu soo guursado, waxaan adeegsan doonaa cudurdaaradan si aan uga dheeraado bixidda:

- ---
- ---
- ---
- ---

- Haddii aan go'aansado inay ammaan tahay inaan dibadda u socdaalo, waxaan u sheegi doonaa qofkan aan ku kalsoonahay \_\_\_\_\_ intii macluumaad aan siin karo oo ku saabsan halkaan aadi doono iyo intay le'eg tahay intaan ku maqnaa doono. Haddii aan awoodo, waxaan kaloo qofkan siin doonaa koobiga baasaboorkayga, itinerigayga iyo faahfaahinta xiriirkayga intaan dibadda jiro.

- Haddii gegida diyaardaha lay qaado aniga oo aan doonayn, ama aan wax dareemo intaan gegidda joogo, waxaan ka codsan doonaa shaqaalaha gegida caawimaad sida ugu dhaqsaha badan oo aan awoodo.

- Haddii lay qaado dibadda, waxaan kala xiriiri doonaa Safaaradda/Qunsuliyadda Australia ee iigu dhow caawimaad ama waxaan kala xiriiri doonaa Xarunta Degdegga Qunsuliyadda (Consular Emergency Centre) Canberra ee 24ka saac ah taleefanka +61 2 6261 3305 ama farriinta textiga taleefanka +61 421 269 080.

- Safaaradda/Qunsuliyadda Australia ee ugu dhow halka aan u malaynayo in lay qaadayo dibadda waa:

- Magaalada: 

---
- Cinwaanka Safaaradda/Qunsuliyadda: 

---
- Lambarka taleefanka Safaaradda/Qunsuliyadda: 

---
- Email-ka Safaaradda/Qunsuliyadda: 

---

(Liiska Safaaradaha dibadda ee Australia waxaa laga heli karaa online-ka ah: [<www.dfat.gov.au/missions/>](http://www.dfat.gov.au/missions/))

**Maxaan samayn karaa haddii aan doonayo inaan guriga isaga tago?**

*Ka-tegiddu waa waqtiga ugu khatarta badan.*

- Haddii aanan dareensanayn ammaan aana go'aansado inaan guriga ka tago waxaan la xiriiri doonaa dadkan ama haya'dahan si aan u weydiisto caawimaad iyo talooyin ka hor intaan tegin:
- AFP \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
- Waxaan weydiin doonaa qofkan lagu kalsoon yahay haddii aan la joogi karo ayaga: \_\_\_\_\_
- Waxaan isku dayayaa inaan qaaato dokumantiyadan muhiimka ah (oo ay ka mid yihiin kuwa carruurta) markaan tagayo:
- *baasaboorka* \_\_\_\_\_
  - *laysanka darawalnimada* \_\_\_\_\_
  - *aqoonsiga sawirka oo kale* \_\_\_\_\_
  - *shahaadada dhalashada iyo/ama guurka* \_\_\_\_\_
  - *kaarka Medicare-ka* \_\_\_\_\_
  - *faahfaahinta bangiga* \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
- Haddii aan karo, waxaan ku haysan doonaa koobiyada dokumantiyadan meel ammaan ah oo aan si fudud uga heli karo ama aan siin karo qof kale oo aan ku kalsoonnahay.
- Waan qaadan doonaa waxyaalahan kale markaan tegayo:
- *sawir dhawaan ah ee naftayda.* \_\_\_\_\_
  - *fureyaasha gurigayga, meesha shaqada iyo/ama baabuurka* \_\_\_\_\_
  - *daawooyinka dhaqtarku qoray* \_\_\_\_\_
  - *kaararka lacagta/bangiga* \_\_\_\_\_
  - *dhar dheeraad ah* \_\_\_\_\_
  - *wixii macluumaad ah kaas oo muujin kara qof kasta oo i-caawinaya ama loo adeegsan karo meeshii aan aaday* \_\_\_\_\_
  - *taleefanka moobaylka* \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
- Haddii aan awoodo, waxaan furi doonaa akoonka bangigayga kahor intaan ka tegin: \_\_\_\_\_
- Waxaan hubin doonaa in qof kasta kaas oo ogaa halka aan tegey inuu garanayo inaysan la wadaagin macluumaadkan cid kale.



**Sidee baan ammaan ku heli karaa kadib markaan ka tago guriga?**

- Waan kala xiriiri doonaa dadkaas ama haya'dahaas wixii caawimaad, taageero iyo talooyin ah:
- AFP
  - \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
  - \_\_\_\_\_
- Waxaan baddeli doonaa lambarka taleefankayga moobaylka iyo wixii faahfaahin shaqsi ee kale oo ay ka mid yihiin baasweedhada online-kayga iyo cinwaannada biilka.
- Waxaan baddeli doonaa rootiinkayga, oo ay ka mid yihiin meesha aan badanaa ka dukaamaysto iyo waddada aan u maro shaqada iyo dugsiga.
- Haddii ay suurtagal tahay, waxaan u sheegi doonaa dadka daryeelaya carruurta kuwaas oo loo ogolaaday inay soo qaadin iyo inaysan u ogolaan carruurta inay meel kale la aadaan qof kale.
- Waan ka taxadari doonaa markaan adeegsanayo warbaahinta mana soo degsanayo sawirro kuwaas oo ay ku jiraan dad ama meel la garan karo.
- waxaan kala hadli doonaa qareen (sida kuwa Xarunta Sharciyeed ee Bulshada (Community Legal Centre) wax ku saabsan dhammaynta sharciga ee wixii guur ah oo hore u dhacay. Waxaan ka heli karaa Xarunta Sharciyeed ee Bulshada (Community Legal Centre) ee iigu dhow <http://www.naclc.org.au/>
- Waxaan codsan in waraaqaha laygu diro B.O. Boxka oo aan lagu soo dirin cinwaankayga cusub.
- Waxaan la xiriiri doonaa Guddiga Doorashada Australia (Australian Electoral Commission) waxaana ka codsanayaa inaan noqdo codeeye qarsoon. Taas macnaheedu waa in magacayga iyo cinwaankayga laga saari doono liiska doorashada.
- Waxaan ka fakari doonaa waxan samayn doono haddii layga soo raaco guriga.
- *Ha aadin guriga ama meel aad keligaa tahay ama ka fog dadka kale.*
  - *Haddii aad bas la socoto, haku degin stop-kaaga. Ama baska ku jir ama ka dalbo caawimaad darawalka, ama ku deg stop-ka halkaas oo dad badan joogaan.*
  - *Haddii aad soconayso oo ay ammaan tahay inaad sidaas sameeyo, baddel jihada aad u socoto. Joog meel u dhow dadka kale intii suurtagal ahba, waxaadna aadaa meesha kuugu dhow oo aad ka dalban karto caawimaad.*
  - *Haddii aad haysato taleefan, wac qof aad ku kalsoon tahay inuu kuugu yimaado meel aad isla ogolaateen.*



## Tusmada Kowaad: Macluumaadka ku saabsan la-kulanka qofka khatarta ugu jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah

Waxa ugu muhiimsan oo tixgelin la siinayo mar kasta waa ammaankaaga iyo ammaanka qofka aad la kulmayso.

### Samee

Ka fiirso haddaad u baahan tahay inaad la xiriirto Boliiska Federaalka Australia (AFP) wixii gacansiin iyo talooyin ah.

Kula kulan qofka oo keliya meel ammaan ah oo gaar ah halkaas oo aan lagu garan karin ayna ku dareemayaan raaxo iyo ammaan.

Halkii suurtagal ahba, hubso in qofku uu awoodo inuu doorto sinjiga iyo itnikada qofka uu la kulmayo.

Ka fiirso haddii turjumaan la-aqoonsan yahay loo baahan doono. Haddii ay saas tahay, weydii qofka waxay doonayaan in sinjiga iyo qawmiyada turjumaanka noqdo.

Hubso in turjumaanka iyo qofka aysan is-aqoon. Waxaad kaloo u baahan tahay inaad si taxadar leh u hubiso in turjumaanku uusan wax xiriiri ah la lahayn bulshada qofka. Xusuuso inaan xiriiradaas aysan mar kasta ahayn kuwo cad.

Sharax qorshaha qarsoodinimada haya'ddaada si cadna u qeex inaad siinayn wax macluumaad ah qofka saaxiibadiis, qoyskiisa ama bulshada la'aanta ogolaanshahooda marka laga reebo duruufo gaar ah, oo ay ka mid yihiin shuruudaha ka-warbixinta qasabka ah. Hubso inay kuu caddahay noocyada xaaladaha kuwaas oo ay tahay inaad la wadaagto macluumaadka ku saabsan qofka (tusaale, haddii ammaankoodu khatar degdeg ah ku jiro).

- Hubso inaad mar kasta u sheegto qofka haddii macluumaadka ayaga ku saabsan laysla wadaagayo.
- Hubso inaad garanayso oo fahamsan tahay shuruudaha ku saabsan gaarnimada iyo la-wadaagidda macluumaadka kuwaas oo ka jira Australia.
- Hel ogolaansho qoraal ah si loo faafiyo macluumaadka qofka, ayadoo la gaar-yeelayo wixii lala-wadaagi karo, cidday tahay iyo muddada waqtiga ay tahay.
- Hubso inaad garanayso oo fahamsan tahay qaababka ilaalinta ilmaha oo macquulka ah, oo ay ka mid yihiin tilmaamaha ka-soo-warbixinta qasabka, taas oo siinaysa jihataynta wax ka qabashada khusaysa danaha ilmaha ee ugu fiican.

U-ogolow qofka inuu ogaado in guurka qasabka ah yahay dambi iyo inay kala xiriiraan AFP wixii caawimaad ah. La-xiriirka AFP wuxuu noqon karaa midaan magac lahayn.

Isku day inaad uruuriso macluumaadka intii aad kartaba maaddaama qofkaasi uusan awoodin inuu mar labaad si toos ah kuula kulmo.

Marna ha iska dhagatirin ama ha iska dhaafin macluumaadka uu qofku bixinayo (xataa haddii ay yihiin kurey).

- Si qeexan ugu sharax xalalka suurtagalka ah oo dhan qofka waxaadna ogolaataa oo yeeshaa doonistooda.
- Ogsoonow haddii qofkaasi u baahan yahay daaweyn caafimaad oo degdeg ah, taageero dhimireed ama caadifadeed.
- Ogsoonow haddii ay jiraan wax dad kale ah oo khatar ku jira (tusaale carruurta walaalaha ah oo kale).
- Ogsoonow haddii qofkaasi uu yahay muwaadin ama dagane Australia ah.
  - Haddii uusan qofkaasi ahayn muwaadin ama dagane Australia ah waa inay talooyin ka dalbadaan wakiilka socdaalka oo diiwaangashan ama Wasaaradda Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha (Department of Immigration and Border Protection) kuwaas oo ku saabsan xaaladda socdaalkooda.
- Garo khiyaarada meel-u-diridda ku habboon, oo ay ka mid tahay faahfaahinaha magacyada iyo xiriirada haya'daha ku habboon kuwaas oo awooda inay siiyaan caawimaad takhasusle iyo taageero dadka khatarta ugu jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah. Macluumaad faahfaahsan waxaa laga heli karaa Tasmada Labaad.

## HA SAMAYN

- Inaad isku daydo inaad qabato la-kulanka qofka iyo qoyskooda ama xubnaha bulshadooda si aad ugala hadasho xaaladda.
- Inaad isku daydo inaad la xiriirto xubnaha qoyska ama kuwa bulshada ayadoo uusan jirin ogolaansho cad ee qofkaas.
- Inaad la-hadasho ama la-kulanto qofka haddii ay la socdaan dad aadan garanayn ama ku kalsoonayn.
- Ha u-golaan xubnaha qoyska inay joogaan kulanka.
- Ha u adeegsan qof ka tirsan bulshada (sida saaxiibada, derisyada ama hoggaamiyeyaasha bulshada) turjumaan ahaan.
- Ha samayn ballanqaadyada aadan awoodin inaad fuliso.
- Ha siin talooyin aadan tababar u haysan inaad bixiso, gaar ahaan talooyinka sharciyeed ama socdaaleed.



## TUSMADA LABAAD: Waddooyinka Meel-u-dirida

Marka lagu daro Boliiska Federaalka Australia (Australian Federal Police (AFP), haya'daha takhasuslaha aan-dowliga ahayn waxay kaloo awoodaan inay siiyaan talooyin iyo caawimaad dadka khatarta ugu jira guurka qasabka ah.

### **1800 RESPECT (1800 737 732): The National Sexual Assault, Domestic & Family Violence Counselling Service (Adeegga Xadgudubka Galmada, Kala-talinta Rabshadda Guriyed, Qoyseed ee Qaranka)**

The National Sexual Assault, Domestic & Family Violence Counselling Service (Adeegga Xadgudubka Galmada, Kala-talinta Rabshadda Guriyed iyo Qoyseed ee Qaranka) waa adeeg taleefan qarsoodi ah iyo kula-talin online ah, oo ay shaqaale ka yihiin la-taliyeyaal xirfad-yaqaano ah si ay u caawiyaan qof kasta kaa soo maray, ama khatar ugu jira, rabshadda qoyseed iyo guriyed iyo xadgudubka galmada.

Taleefanka: 1800 RESPECT (1800 737 732)

La-talinta Online-ka ah waxaa laga heli karaa website-ka hoos ku qoran.

Website: [www.1800respect.org.au](http://www.1800respect.org.au)

### **Anti-Slavery Australia Australia (Haya'dda Ka-hortagga Adoonsiga Australia)**

Anti-Slavery Australia (Haya'dda Ka-hortagga Adoonsiga ee Australia) waxay degan tahay Sydney waxayna siisaa talooyinka sharcieed oo ballaaran, qareenid iyo caawimaad dadka khatarta ugu jira guurka qasabka ah.

Taleefanka: 02 9514 9662

Email-ka: [antislavery@uts.edu.au](mailto:antislavery@uts.edu.au)

Website-ka: [www.antislavery.org.au](http://www.antislavery.org.au)

### **Xarunta Xuquuqul Insaanka ee Haweenka Muslimka Australia (AMWCHR)**

AMWCHR waxay degan yihiin Melbourne waxayna ka shaqaysaa inay horumariso xuquuqda iyo aqoonsiga haweenka Muslimka ee Australia.

Somali

AMWCHR waxay siisaa Kays work, meel-u-dirid, la-talinta labaad iyo adeegyada outreach ee dadka khatarta ugu jira guurka qasabka ah.

Taleefanka: 03 9481 3000

Website-ka: [www.ausmuslimwomenscentre.org.au](http://www.ausmuslimwomenscentre.org.au)

### **Australian Red Cross (Laan-qayrta Cas ee Australia)**

Australian Red Cross (Laan-qayrta Cas ee Australia) waa hay'ad banii-adamnimo oo u go'doontay wax ka qabashada baahiyaha dadka khatarta ku jira ee bulshada.

Email-ka: [national\\_stpp@redcross.org.au](mailto:national_stpp@redcross.org.au)

Website-ka: [www.dss.gov.au](http://www.dss.gov.au)

\*Australian Red Cross (Laan-qayrta Cas ee Australia) waa bixiyaha adeegga oo qandaraas ka haysata Taageerada Dowladda Australia ee Barnaamijka dadka Sharci-darrada lagu keenay. Dadka khatarta ku jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah waxa keliya oo loo diri karaa Barnaamijka Taageerada oo ay waddo AFP.

### **Salvation Army (Ciidanka Badbaadinta)**

Salvation Army (Ciidanka Badbaadinta) waxay siisaa taageero degaan iyo maaraynta kayska dadka khatarta ugu jira ama ugu jiri doona guurka qasabka ah.

Taleefanka: 02 9211 5794

Email-ka: [endslavery@aue.salvationarmy.org.au](mailto:endslavery@aue.salvationarmy.org.au)

Website-ka: [www.endslavery.salvos.org.au](http://www.endslavery.salvos.org.au)

### **Macluumaadka xeerka qoyska**

Xarunta Wax-weydiinta Qaranka ee Maxkamadda Xeerka Qoyska

Taleefanka 1300 352 000

Email-ka: [enquiries@familylawcourts.gov.au](mailto:enquiries@familylawcourts.gov.au)

### **Adeegyada Fasiraadda**

Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda

Taleefanka: 131 450